



**Machadka kulliyada shaqada
ee Tampere nawaaxigeeda**

***Ku soo dhawow inaad wax ka
barato ama hiwaayad
ku yeelatid!***

Waa maxay kulliyada shaqadu?

Maxaan ka baran karaa?

Tampere nawaaxigeeda kulliyada shaqadu waa machadka waxbarashada iyo Finland machadka waxbarashada ee ugu da'ada weyn. Waxaad ka baran kartaa machadka kulliyada shaqada luqadaha, qalabka xirfadaha, farshaxanka iyo horu marinta caafimaadka. Koorsooyinka machadku waa kuwo u furan dhammaan dadka oo dhan.

Koorsooyinku waa wax wanaagsan in wax laga barto waxyaalo badan oo hiwaayado ah! Waa muusiga, ranjiyeynta, qoob ka ciyaarka, joogada, harqaanka/dawaarka, xilmiga kombiyuutarka, luqadaha iyo xataa maxay! Machadka bogga shabakada waxaad ka fiirsan kartaa, koorsooyin nooc ee ah ayaa hadda laga fidinayaa ama laga akhrisanayaa si dheeraad ah maadooyin kala duduwan:



Luqadaha



Maadooyinka cilmiga



Farshaxanka



Xirfadaha gacanta



Horumarinta caafimaadka



Machadka kulliyada shaqadu waxay qorsheysaa sanadkii meelaha 2000 oo koorso. Koorsooyinka qaarkood waa kuwo dhaadheer ama gaagaaban, sidaas awgeed waxaad ka dooran kartaa bogga doorashada kuwa kugu habboon. Sanadka oo dhan koorso cabirkeedu yahay waxay bilaabantaa deyrta iyo guga dhammaadkiisa. Tusaale ahaan deyrta koorsooyinkoodu waxay qaataan meelaha 12 todobaad. Sida qaaliibka ah koorsooyinka waxaa la iskugu yimaadaa todobaadkii hal mar. Koorsooyinka gaagaaban waa hal mid ama waxbarasho dhowr jeer ah mid dhan.

Machadka kulliyada shaqada koorsooyinkooda waxaa lagu bartaa sida badan finnish. Machadka kulliyada shaqadau waxay qorsheyneysaa sidoo kale qaar ka mid ah koorsooyinka luqada ingiriisiga iyo tusaale ahaan xirfadaha koorsooyinka kala duduwan. Xataa haddii aanad ugu hadleynin finnishka si wanaagsan, waad ka qeyb geli kartaa koorsooyin dhowr ah. Machadku wuxuu leeyahay sidoo kale doorashooyin wanaagsan oo koorsooyinka shabakada ah.

Koorsooyinkaasi intooda badani waa lacag. Qiimaha koorsoadu mar walba waxay ka muuqataa warbixinta koorsoada. Haddii ay koorsoadu lacag la'aan tahay, waxaa ku qoran warbixinta koorsoada *lacag la'aan* ama 0,00 €.



Haddii aad dooneysid inaad wax ka sii weydiisid, la soo xidhiidh machadka adeegiisa macaamiisha. Sidoo kale qorsheeyayaashu wey ku caawinayaan, haddii aad uga baahan tahay koorsooyinka qaar ka mid ah warbixin dheeraad ah. Adeegga macaamiisha iyo qorsheeyayaasha warbixinaha xidhiidhkooda waxaad ka heleysaa machadka bogiisa shabakada.

Ma ka baran karaa finnishka?

Machadka waxaa laga bartaa koorsooyin badan oo luqada finnishka ah. Waxayna ku kala habboon yihiin ardeyda kala heerarka duwan. Warbixinta koorsada waxaad ka arkeysaa, heerkee ayay ka tahay sida koboca tixraaca reer Yurub uu dhigayo. Goobaabinaha waxaad ka arkeysaa takhasusyada guud ee kuwaas u dhigma heerkooda (=HEERKA- YKI):

Heerka aasaasiga ah ee luqad isticmaalaha

A1 xirfada luqada ee bilowga ah (YKI 1 heerka aasaasiga ah)

A2 xirfada luqada ee aasaasiga ah (YKI 3 heerka aasaasiga ah)


Iskiis luqad u isticmaalaha

B1 xirfad luqad oo aasaasi ah oo wanaagsan

(YKI 3 heer dhexdhexaad ah)

B2 Ugu howlgalaya iskii ahaan xirfada luqada

(YKI 4 heer dhexdhexaad ah)



Waxaad dooran kartaa koorsooyinka luqada finnishka, kuwa lagu tababarto hadalka ama qoraalka, la isuguna diyaariyo tijaabooyinka- YKI ama

tusaale ahaan shaqooyinka. Koorsooyinku wey isbedbedalaan sanad walba, sidaas awgeed iska hubi, maxaa koorsooyin hadda ka jira machadka. Haddii anad hubin, waxa ay tahay koorsada adiga kugu habooni, la soo xidhiidh qorsheeyaha luqadda finnishka ee labaad.

Machadku wuxuu diyaariyaa oo kala duduwan, tusaale ahaan akhriska iyo qoraalka xirfadahooda kuwa aanan aqoonin iyo sidoo kale hooyooyinka iyo carruurta. Kuwaasina intooda badani waa lacag la'aan.

Sidee ayaa la siku diiwaan geliyaa?

Koorsooyinka soo wargelintoodu inta badan waxay bilaabmaan bilaha ogosto iyo diisamber. Xilligga deyrta koorsooyinku waxay bilaabmaan sebtember koorsooyinka xilligga guguna waxay bilaabmaan janaayo.



Waxaad iska soo diiwaan gelin kartaa si fudud shabakada cinwaankeeda
www.uusi.opistopalvelut.fi/tampere.



Haddii aanad lahayn lambarada aqoonsiga ee finnishka, la soo xidhiidh machadka kulliyada shaqada xafiiskooda tusaale ahaan cinwaanka. Cinwaanku waa tyovaenopisto@tampere.fi.



Waxaad iska soo diiwaan gelisaa sidoo kale machadka kulliyada shaqada xafiiskeeda ama soo wac lambarka **040 801 6471**.

Xusuuso, in koorsada iska diiwaangelinteedu ay tahay mid aad ku dhaqmeysid. Koorsada waxaa laga baajin karaa si lacag la'aan ah maalinta ku todobada ah inta uunan bilaabmin. Haddii aad baajin weydid ka qeybgelidda, waa inaad bixisid dhammaan koorsada oo dhan. Xusuuso inaad baajisid is diiwaan gelinta, xataa haddii koorsadu ay tahay mid lacag la'aan ah, sababtoo ah waxaad booska ka buuxineysaa ardey kale.

Tilmaamaha is diiwaangelinta waxaad ka heleysaa shabakada iyadoo finnish ah, iswidhish ah iyo ingiriisiba:

uusi.opistopalvelut.fi/tampere/fi/help

Machadka kulliyada shaqada sanadka



Juun: Koorsooyinka deyrta waxaa lagu soo shaaciyaa machadka bogga shabakadiisa.

Julaay: Tilmaanta-machadkaa waxaa ka soo muuqaneysa Tampere iyo Ylöjärvi.

Ogosto: Is diiwaangelinta gebi ahaanba sanad dugsiyeedka koorsooyinkooda iyo deyrta koorsooyinkoodu waxay ka bilaabmaan shabakada. Is diiwaangelintu waxay ka bilaabaneysaa sidoo kale xafiiska ama telefoonka.

Sebtember: Inta ugu badan qeybo ka mid ah waxbarashadu waxay bilaabmaan.




Nofember: Qeybaha ugu badani deyrta waxbarashadu waxay dhamaaneysaa.



Desember: Is diiwaangelinta koorsooyinka gugu waxay ka bilowdaan shabakada.

Janaayo: Is diiwaangelinta koorsooyinka gugu waxay ka bilowdaan shabakada. Inta ugu badan waxbarashadu waxay bilaabmaan.




Febraayo-maarso: Waxbarashadu ma lahan todobaadka fasaxa ee xilliga barafka 9.

Abril: Qeybaha ugu badani deyrta waxbarashadu waxay dhamaaneysaa.



Taariikhaha sugan waxaad ka heleysaa bogga shabakada ee machadka.

Ku soo dhawoow inaad ku soo biirtid! Waxaan isku arkeynaa koorsooyinka!





Warbixinaha xidhiidhka

Machadka kulliyada shaqada ee Tampere nawaaxigeeda

Tel. 040 801 6471

tyovaenopisto@tampere.fi

www.tampere.fi/tyovaenopisto

uus.opistopalvelut.fi/tampere

Warbixinaha xidhiidhka ee dheeraadka ah

tampere.fi/tyovaenopisto/yhteystiedot

Dhismaha weyn ee machadka kulliyada shaqada ee Tampere nawaaxigeedu waa Sampola. Sampola cinwaankeedu waa

Sammonkatu 2, 33540 Tampere.

Fiiri machadka kulliyada shaqada goobaheeda waxbarashada iyo xafiisyada cinwaanadooda bogga shabakada machadka:

www.tampere.fi/tyovaenopisto/opetuspaikat



Warbaahinta bulshada

Waxaad kala socon kartaa dhinaca warbaahinta facebooka, instagramka iyo youTubeka. Waxaad ku heleysaa magaca Tampere machadka kulliyada shaqada nawaaxigeeda.